



## Xoogaga Isku-Dhafka ee 151 iyo Ciidamada Bada ee Midawga Yurub Waxay ka Wada Shaqeeyaan sidii ay u Xaqiijin Lahaayeen in aany Budhcad-Badeedu ku Yeelan Meel ay ku Gabadaan Badwaynta Hindiya Dhexdeeda.

---

**Galinkii hore ee maanta markabka roondada ee Roomaaniya ee ROS Regele Ferdinand kaas oo hoostaga Ciidanka Bada ee Midawga Yurub (EU NAVFOR) ayaa waxa uu iskaashi dhaw la yeeshay markabka dagaalka ee Turkiga TCG Gemlik ee Xooga Isku-dhafka 151 (CTF-151) si ay u qabtaan sagaal budh-cadbadeednimo looga shakiyay dhinaca xeebta bada Soomaaliya**

Saacadihii hore ee aroortii, diyaarad Iswidhish ah oo ka tirsan diyaaradaha roondada bada ee Ciidamada Midawga Yurub waxay calaamdaysay doon-shiraac yar oo joogtay meel 420 mayl-badeed u jirtay bariga Muqdisho. Ciidamada ka hor taga budhcad-badeeda ayaa markiiba la wargaliyay. Hadaba maadaama labada markab ee TCG Gemlik and ROS Regele Ferdinand ay ahaayeen kuwa ugu dhaw, waxay si dhaqaso leh ugu talaabsadeen baadi-goob, iyadoo diyaarada roondada bada ee laga leeyahay Lugsanberg oo ka mid ah Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ay dusha kala socotay.

Markabka TCG Gemlik ayaa meeshii dhacdada u diraaq koox si ay u raadiyaan doonta laga shakiyay, taas oo mudo hal saac ka badan isku dayaysay inay ka fakato. Hadaba wada shaqayn fiican oo ay sameeyeen labada xoog ee ka hortaga budhcad-badeeda darteed ayaa markabka ROS Regele Ferdinand waxa uu budhcad-badeedii laga shakisnaa u qaaday dhinaca markabka roondada ee ay leeyadahay Roomaaniya ismarkaas dushiisa saaray si su'aalo dheeraada loo waydiiyo loogana uruuriyo cadaymo taaso ujeedadeedu ahayd in si buuxda loo darso suurta galnimda in dambi lagu soo oogo sagaalkan eedaysane.

Ka dib markii cadaymaha la uruuriyay ayaa doon-shiraaceedkii la burburiyay si looga hor tago in budhcad-badeedan laga shakiyay ay markale weeraro ugu qaadaan maraakiibta.

Isagoo hadlaya ka dib hawlgalkan lagu guulaysaty ayaa Aderal Dhexe Potts , oo ah Taliyaha Hawlgalada ee Ciidamada Midawga Yurub waxa uu yidhi "aad baan ugu faraxsanahay in wada shaqayanta isku-dhafka darteed ee xoogaga la dagaalanka budhcad-badeeda ee gobalka ay markale si degdega ah u heleen una burburiyeen doonta budhcad-badeeda la tuhmay kuwaas oo isku soo biimeeyay bada iyagoo raba inay afduubaan maraakiibta ganacsiga iyo shaqaalahooda ee Badwaynta Hindiya dhexdeeda. Sidii aan bishii Oktoobar sheegay, maadama xililigii mansuunku dhamaaday waynu ogayn in budhcad-badeedu nasiibkooda bada tijaabindoonto, tanina waa sababta

aan si joogta ah uga digaynay in la fudaydsado. Markale fariintayda aan u dirayno budhcad-badeeda waa mid cad – waan idin daawanayna waanan qorshaynay inaan idin qabano hadii aad bada soo fuushaan. Sidoo kale tani waxay tusaale u tahay in wali budhcad-badeedu ay doonayaan inay dhinaca bada soo aadaan, hadaba dhamaan qaybaha ku hawlan la dagaalanka budhcad-badeeda ha noqdaan ciidamo ma ganacsato waa inay foajignaadaan una diyaarna groobaan.